



Soo bandhigidda Xirmada Xalka!

Qoysaska Sharafka leh,

Qeyb muhiim ah oo ka mid ah diyaargarowga dugsiga barbaarinta carruurta waa in la yeesho xirfado shucur-bulsho oo awood leh. Tan waxaa ka mid ah oggaanshaha sida loo xalliyo dhibaatooyinka bulsho ee caadada ah. Fasalkeena wuxuu isticmaalaa qalab loo yaqaano *Xirmada Xallinta* oo carruurta ka caawiyo in ay xaaladda u aqoonsadaan dhibaato kaddib na isku dayaan xalal kala duwan. Muqaaladaan waxay xasuus ahaan diyaar ku yihiin qolkeena.

Xirmada xaalka wuxuu sidoo kale la imaadaa nooc guriga lagu isticmaali karo oo leh xalal dheeraad ah oo ku habboon xaaladaha guriga ka dhici karo. Waxaan koobiga qalabka xalka ee qoyska soo raacinnay warqaddaan.

Waxaad ilmahaaga ka taageeri kartaa in ay guriga wax ku bartaan adigoo:

- Qoraalka xirmada xalinta qoyska ku dhejinaaya meel laga arki karo (tusaale, albaabka qaboojiyaha, albaabka qolka jifka ee ilmaha, iwm.) iyo in aad ka hadasho waxa xalalka kala duwan ay yihiin iyo micnahooda.
- In aad sheegto marka aad la kulanto dhibaato—dhibaato kasta—iyo xalka aad dooratay. Tusaale ahaan, haddii tiishka uu kaa dhamaado, kor u dheh, “Alaa maya, dhibaato ayaa i heysata; Waxaan u baahanahay tiish mana laha. Muxuu xalkeyga noqonaayaa?” Ilmahaaga ugu yeer in uu kaa caawiyo waxa xiga oo aad sameyn doonto. Tan waxay ka caawin doontaa in ay bartaan habka fikirka ee xalinta dhibaataada.
- Isticmaalka joogtada ah ee erayada “**dhibaato**” iyo “**xal**” si aad ilmahaaga uga caawiso in ay bartaan erayadaas.

Fadlan, xor u noqo in aad na weydiiso wax su'aal oo aad hayso ee ku saabsan Xirmada Xalka ama qaabka aan wax uga qabanno horumarinta shucuurta-bulsho!

